



## Qalabka Dayactirka Barkadaha

### Saamaynta ay Maadooyinkeenu ku yeelanayaan Shubka

Barkadaha waxaan u keennay qalab lagu dayactiro, kasoo markuu qalalo lakab biyaha celinaya ku samaynaya darbiyadda Barkadda.



### Goobaha Loo Isticmaalo Qalabkaan



Barkaddaha & Biyo xireenadda    Buundooyinka iyo Biyo marenka    Aasaaska Dhismaha

### Sababta uu Shubku ugu Baahanyahay in Biyaha Laga Difaaco

Shubka dahaarkiisa kore wuxuu leeyahay godad yar yar iyo tarar aysan indhuho arki karin kuwaas oo u ogalaanaya biyuhu inay shubka gudhiisa u gudbaan. Dhinac markii laga fiiriyo biyahaas waa loogu baahanyahay si uu shubku u adkaado, balse dhinaca kale biyuhu waxay dusha kore ee shubka usoo qaadayaan walax sida cusbadda taasoo difeyto u geysanaysa shubka, arintaas waxay keenaysaa shubku inuu noqdo mid aan muda dheer sii jirin.

### Shubka aan Biyaha Laga difaacin    Shubka Biyaha laga difaacay



Biyahaas u gudbaya shubka waxay sababayaan in walax ku milantay biyaha sida chlorides ama cusbooyin kale inay dhexgalaan dusha sare ee shubka, taasoo sababaysa inay daxalaystaan birihii shubka iyo difeetooyin kale oo ay dhismaha u geystaan. Dusha sare ee shubka oo qoyan waxay sidoo kale la kulmaan korriinka dabiiciga ah ee wasakh iyo caaryo, kuwaas oo sababa bilicda shubka oo hoos u dhacda iyo dhaawacyo kale oo dhismaha soo gaara.

## Qalabka Dayactirka Saqafyadda



### Maadadda Polytex iyo waxqabadka Saqafka

Maadadda Polytex waa mid tayadeedu sarayso taasoo markii la mariyo saqafka, lakab biyaha celinaya ku samaynaysa dusha kore ee saqafka.

### Faa'idooyinka laga dhaxlayo

- Iska caabin heer sare ah ee biyaha iyo qoyaanka.
- U adkaysiga qoraxda (UV Rays)
- Isticmaalka maadada oo sahlan
- Isku haynta dilaaca shubka

### Goobaha Loo Isticmaalo Qalabkaan



Saqafyadda Shubka ah    Cagta hoose ee suuliga    Kanaaladda Biyaha

### Qaabka Loo Isticmaalo



Waxaan kuu haynaa qalab kala duwan oo lagu dayactiro Barkadaha, Saqafyadda, aasaaska dhismaha iyo dhamaan goobaha dhismaha ee biyo joojinta u baahan.

